Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 3-aad
Documentiga kol.3-aad.kul-24-aad **02/11/2013**

Kalfadhiga 3-aad
Kulankiisa 24-aad-sac-fur.11:33gh, sac xir01:25gd.
Guntinta(Qourum)160
Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Dooddii Heshiiskii Favori(socday)**

Shir-Guddoomiyaha Guddoomiye K/Xigeenak 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad,

Waxaa shirka furay Guddoomiye K/xigeenka 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad, waxaana lagu furay Aayadha Qur'aanka Kariimka uuna akhriyay Xil.Maxamed Hiiraale. Intaa kadib Guddoomiyaha ayaa wuxuu u yeeray Wasiirka Warfaafinta si uu u dhameystiro jawaabta su'aalaha soo socda.

Su'aal

Xil. C/qaadir Xaashi wuxuu sheegay in shirkadda Favori la siiyay Garoonka Diyaaradaha Adan Cabdule Cusmaan waa Exculsive uu micnaheedana yahay in xuquuq gaar oo xafidan ay leedahay, wuxuu intaa ku daray inuu amniga sidaa ahaan doonin.

1. Wuxuu weydiiyay in haddii shirkadda hishiiska lala galay ay fulin weyso ma waxaa laweydiindoonaa wasaaradda Gaadiidka mise shirkadda Favori?
2. In wasiirka Gaadiidka wixii macluumaad ah u soo gudbiyo iyadoo koobi ah Golaha Baarlamaanka.
3. Shirkadaha Ajaanibta eek a soo galaaya Garoonka Diyaaradaha ma waxa fasax siinaya wasaaradda Gaadiidka mise Favori.

Xil. Taaw wuxuu sheegay inuu Wasiirka soo bandhigay Naqshada , haddaba ma inoo faafaahin karaa mise baarkin ayaa loo baahan yahay,intaa kadib wuxuu soo jeediyay in la ansixiyo.

Xil. Maxamed Cabdi Yuusuf wuxuu sheegay in loo baahan yahay in marka hore loo bandhigo shirkadda loona gudbiyo Dunida, lana yiraahdo yaa ka qeybgalaayo? Waa in laga digtoonaadaa shaqsiyaadka la galaaya heshiisyada.

Xil. C/qafaar Maxamed Omaar,wuxuu weydiiyay in shirkadda Favori ay iska soo diiwaan galisay Wasaaradda Gaadiidka iyo inkale, wax dibowsid ah Malaga hayaa, haddii shaqadii lagu heshiiyay ay qaban weydo maxaa laga yeelayaa?

Lacaga hawada run wayga sharcigii 1961 wuxuu qoraayaa inuu ahaa 20.00 00 shilin wax kabadan uu galin Karin wuxuu weydiiyay sharciga uu u cuskaday Wasiirka.

Jawaab

Wasiirka wuxuu soo jeediyay su'aalaha tooska ah iyo kuwa soo noq noqda wuxuu sheegay inay badan yihiin kuwa soo noq-noqda,wuxuu kaloo sheegay in wixii Recomandation ah in lasiiyo Guddiga Gaadiidka ee Baarlaamaanka wuxuu intaa ku daray inaysan yareyn$18.000.000 oo dolar, lacag yarna ma aha mana jirto wax istaader ah uu sheegay inay istaader yihiin,

Waxaa loo xilsaaray Garoonka amaankiisa, laakiin amaanka Guud waxaa ka mas'uul ah Dowladda Soomaaliya wuxuu sheegay inuusan hubin

Mahubo in laga daba tagaayo SKA intii suuragal ah, wixii talo ah wuu qaadanayaa waxaa la kordhiyay Run weyga dhinacyadiisa midig iyo bidix, wuxuu sheegay ineysan jirin Cargo waxayna ku qanacsan yihiin inay qaataan 55% shirkadda weyna ka diiwaan gashan tahay Wasaaradda Ganacsiga

Xukuumadda wax dacwo ah ma aysan galin wax Garsoor ah uu warqad ka helayna majiraan, wuxuu jabiyayna majiraan,waxaana shirkadda ka heynaa 1.5milyan oo Dollar

Su'aal

Xil.C/raxmaan suge wuxuu sheegay in Garoonka uu ku tagay kormeer uuna soo arkin barkin shaqeeynaya,wuxuuna codsaday in ay wada shaqeeyaan Wasaaradda iyo Guddiga Gaadiidka jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**.**

Xil. Sahro Jaamac qoorsheel, waxay sheektay inay Dowladda ay leedahay sharci wax walba ay Dowladda ay galeyso waxaa muhiim ah inay sharciyeysan tahay.

1. Waxay wediisay Wasiirka inuu keeno sharciga ay heshiiskaan kula gashay Wasaaradda shirkadda Favori?
2. Waxay weydiisay sharciga uu u tiiksaday Wasaaradda Service ka dadweynaha uu lahaa oo wax loogu qaban lahaa?
3. Waxay weydiisay inuu heshiiska ku jiro haddii ay shirkadda Favori ay qalad gasho lagu maxkamadeeyo dalka Soomaaliyag Gudihiisa?
4. Waxay wediisay cidda waardiyeysa qalabka lasoo qaadayo, yaana ka ilaalinaayo kontrobaanka?

Xil. Kulilihi, wuxuu sheegay in shirkadda SKA aysan waxba ka qaban Garoonka Diyaaradaha Adan Cade

-shirkadda Favori waxay ka kooban tahay 9 shirkadood, waxay hadda kahor ay dalka soo galiyeen $3.000.000 (saddex milyan oo doolar) oo lagu qabtay shirkada Favori, waxaa lala galay kunturaad, lacagtana inta lasheegay wey kabadan tahay, wax kasta hadhacaanee wuxuu soo jeediyey in ladhowri sharaftooda, secuuritigana waxaa ka mas'uul ah dowladda.

Jawaab:

wasiirku wuxuu sheegay in shirkadda Favori ay siiyeen maamulka garoonka, shirkaddu diyaarad gaar ah malaha, awood gaar ah ay leedahay majirto. Heshiska 55% iyo 45% wey kuqanacsan yihiin, adeegyada dhamaan waxaa qabaneyso shirkadda, ayagaana laxisaabtamayaan ka Dowlad ahaan, waxayna mideeyeen dhamaan lacagaha garoonka sida, land-fee, navigation iyo parking

Xil. Cabdi Barre. Wuxuu weydiiyey shirkadaan sharciga lahayn waxa ku kalifay in wasaarada ay sharciyeyso , sharciga loo adeegsadayna waa midma? Kaararka cusub ay wasarada ay sameysay sow ma'aha in aad ku fududaateyn shirkada shaqadeeda iney sii wadato. Wuxuu soo jeediyey in Baarlamaanka lahor keeno Agaasimaha T.Vga Radio Muqdisho, si wax looga weydiiyo arimo laxariira shaqadooda.
Xil. Cusmaan Xaaji wuxuu sheegay in Baarlamaanka uu yahay sharci dajiye wuxuu intaa ku daray in SKA ay kreyn jirtay Guryo badan ay ka dhistay Airporka wuxuu soo jeediyay in sharcigaan loo gudbiyo Guddiga u xilsaaran si ay wax ugu daraan ama ay u gudbiyaan.
Xil. Ali Ganey wuxuu sheegay in Baarlamaanka loo daayo waajibaadka shaqadooda wuxuu weydiiyay in uu haayo go'aankii maxkamadda sare xukunkeeda, adigana waxaad diiday xukunkaas inaad araktay. Ma waxay kula noqotay mid kuu cuntami weysay wuxuu sheegay in layska shaqeeyo iyadoo aan lasoo marsiin Golaha Baarlamaanka wixii heshiisyo ah,taasna suura gal maha.

jawaab

Wasiirka wuxuu sheegay qandaraaska inuu qaato waxaa u ogolaaday Qod.99-aad ee Dastuurka wuxuu kaloo sheegay inuu horgeeyay Golaha Wasiirada weyna ansixiyeen mana uusan helin warqad maxkamadda ka socodto wixii talo ah ay u soo jeediyeen Baarlamaanka wuxuu sheegay inay qaateyn

Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyay in lasii wado doodii shirka waxaana haray 8xildhibaan, xildhibaanadii waxay ogolaadeyn in maalinta barito ah dooda loo dhigo.

Shir-Guddoomiyaha Golaha Shacabka mudane Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari)wuxuu sheegay kalfadhigii 3-aad kulankiisa 24-aad uu xiran yahay saacadda markey ahayd 01:25gd